mid ah gurigaaga uu qabo cagaarshowga B, u keen carruurtaada dhakhtarka qoyskaaga si uu u tallaalo.

- Tallaalka cagaarshowga B waa badqab, tallaal waxtar leh iyo difaaca ugu fiican. Tallaalka waxa lagu bixiyaa koorso saddex irbadood ah. Saddex irbadood ka dib, waxaa laga yaabaa in mararka qaarkood lagaa qaado baaritaanka dhiigga si loo hubiyo in aad hadda difaacan tahay iyo in kale. Waxyeelooyinka ka dhasha waxay noqon karaan cudud xanuun iyo guduudasho meeshii irbada lagaaga duray.
- Haddii aad uur leedahay ama aad rajaynayso inaad uur yeelato waxa fiican inaad tan kala hadasho dhakhtarkaaga ka hor inta aadan qaadanin tallaalka.
- Ha u oggolaan carruurta inay taabtaan dhiig ama dareeraha jirka, ama tiishash kasta oo kuwan ku wasakhoobay, ee qof qaba caabuqa cagaarshowga B.
- Haddii carruurta ay u bayla noqdaan dhiigga qof qaba caabuqa cagaarshowga B oo aan looga difaacin caabuqa tallaal, waxaa looga ilaalin karaa cagaarshowga B haddii ay si degdeg ah u helaan daaweyn. Waa inaad canuga u keentaa dhakhtarkaaga ama Waaxda Gurmadka Degdega ah oo aad sheegtaa inay xiriir la yeesheen cagaarshowga B. Waxa lagu duri doonaa borotiinka difaaca jirka ee cagaarshowga B (HBIG) oo waxay bilaabi doonaan koorsada tallaalka cagaarshowga B.
- Ha la wadaagin burushka ilkaha, sakiimaha, cirbadaha, galalka cidiyaha, cidi jarayaasha, maqasyada cidiyaha, dharka dhaqmada ama shukumaanada qof qaba caabuqa cagaarshowga B.

## Kuma faafin kartid cagaarshowga B markaad

- Hindhisto ama qufacdo
- Dhunkanayso ama habsiinayso
- Naasnuujinayso
- Cunto ama biyo
- La wadaagayso suxuunta ama galaasyada
- Xiriirka caadiga ah (sida marka la joogo shaqada)

Waa inaan lagaaga saarin daryeelka ilmaha, dugsiga, shaqada, ama hawlaha kale sababo la xiriira inaad qabto cagaarshowga B.

## Xasuusnow:

Xaqiiji in canugaaga uu ku dhammaysto koorsada tallaalka cagaarshowga B wakhtiga saxda ah si canugaaga uu u noqdo mid difaacan.

## Sidee ayaan wax dheeraad ah u ogaan karaa?

Macluumaad waxtar leh oo ku saabsan cagaarshowga B waxaa laga heli karaa ilaha soo socda:

- Dhakhtarka qoyskaaga
- Waaxda caafimaadka dadweynaha ee deegaanka ee HSE

Waxaad ka heli kartaa buug-yarayaal kale oo ku saabsan cagaarshowga B mareegaha soo socda:

- www.hpsc.ie
- www.cdc.gov/hepatitis/hbv
- www.who.int
- www.immunisation.ie

Taariikhda daabacaada: Abriil 2017

Qorayaasha: Kooxda Shaqeynta Cagaarshowga ee Kooxda Cudurada Faafa ee Daawada Caafimaadka Dadweynaha, Waaxyaha Caafimaadka Dadweynaha iyo Xarunta Kormeerka Ilaalinta Caafimaadka, Fulinta Adeegga Caafimaadka.

hpsc

# Cagaarshowga B

Adiga iyo Canugaaga



Haddii aad qabto cagaarshowga B oo aadna uur leedahay, qorshaynayso inaad uur yeelato, haddii aad hadda uun ilmo dhashay ama aad hore u haysatay carruur, buug-yarahaan ayaa ku siin doona macluumaad ku saabsan sida aad u ilaalin lahayd canugaaga iyo carruurtaada.

Tallaalka ayaa aad waxtar ugu leh ka hortagga caabuqa cagaarshowga B ee ku dhaca dhallaamada iyo carruurta.

## Waa maxay cagaarshowga B?

Cagaarshowga B waa fayras saameeya beerka wuxuuna kugu ridi karaa xanuun daran. Waxa lagu kala qaadaa taabashada dhiiga ama dareeraha jirka ee qofka caabuqa qaba. Dadka qaar ee qaba cagaarshowga B weligood kama bogsoodaan fayraska waxaana laga yaabaa inay cudurka la noolaadaan noloshooda oo dhan. Kani waa caabuqa cagaarshowga B ee muddada-dheer waxaana laga yaabaa in dadka qaba ay dadka kale qaadsiiyaan. Dadka qaarkood ee qaba caabuqa cagaarshowga B ee muddada-dheer waxay sii wadi karaan inay yeeshaan cudurka beerka oo daran. Dadka qaarkood ee qaba caabuqa cagaarshowga B ee muddada-dheer ma lahan calaamado waxaana laga yaabaa inay fayraska qaadsiiyaan kuwa kale iyaga oo aan ogayn.

## Kawaran haddii aan uur leeyahay?

Haweenka uurka leh waa in laga baaro cagaarshowga B. Haddii baaritaanka lagaaga helo cudurka, dhakhtarkaaga dhalmada ama dhakhtarka qoyska ayaa laga yaabaa inuu kuu gudbiyo dhakhtar takhasus leh.

## Waa maxay khatarta ku wajahan canugayga?

Waxaad u gudbin kartaa cagaarshowga B dhallaankaaga marka aad dhasho ama wax yar ka dib dhalashada marka laga reebo haddii canugaaga la tallaalo.

Carruurta uu ku dhaco cagaarshowga B horaanta noloshooda waxay halis weyn ugu jiraan cabuuqa muddada-dheer. Ilaa 90% dhallaamada uu ku dhaco markay dhashaan waxay yeelan doonaan caabuq mudda-dheer marka laga reebo haddii la tallaalo. Tani waxay badanaa keentaa dhibaatooyin caafimaad mustaqbalka dambe ee nolosha.

## Sidee ayaan u ilaalin karaa canugayga?

Sida ugu wanaagsan ee aad uga ilaalin karto dhallaankaaga cusub cagaarshowga B waa tallaalida. Tallaalka waxaa uu ka kooban yahay tallaalka cagaarshowga B oo uu weheliyo borotiinka difaaca jirka ee cagaarshowga B (HBIG).

- Garoojada ugu horreysa ee tallaalka cagaarshowga B iyo garoojada borotiinka difaaca jirka ee cagaarshowga B (HBIG) waa in la siiyaa dhallaankaaga wax yar ka dib dhalashada.
- Hubi in dhallaankaaga uu qaato garoojooyinka xiga ee tallaalka - badanaa marka uu jiro da'da laba, afar iyo lix bilood, taas oo qayb ka ah jadwalka tallaalka carruurnimada ee caadiga ah.
- Dhakhtarka qoyskaaga ama dhakhtarka carruurtaada ayaa ka qaadi doona baaris dhiig laba bilood ka dib marka koorsada tallaalka la dhammeeyo si loo xaqiijiyo in dhallaankaaga uu qabo cudurka iyo in kale. Haddii canugaaga uusan cudurka qaadin, baaritaanka dhiiga waxa ay hubinaysaa in canugaaga uu difaacaayo tallaalka.
- In ka badan 95% dhallaamada qaata jadwalka tallaalka cagaarshowga B oo buuxa iyo borotiinka difaaca jirka ee cagaarshowga B ayaa ka difaacan cagaarshowga B.

> Xaqiiji in canugaaga uu ku dhammaysto koorsada tallaalka cagaarshowga B wakhtiga saxda ah si canugaaga uu u noqdo mid difaacan.

## Tallaalka cagaarshowga B miyuu yahay mid badqab ah?

- Tallaalka cagaarshowga B waa mid badqab iyo waxtar leh.
- Waxyeellooyinka ka dhasha waxa ka mid noqon kara xanuun iyo guduudasho ku timaada meeshii irbada lagu duray.
- Tallaalka cagaarshowga B waxa la isla qaadan karaa sida tallaalada kale ee carruurnimada.
- Tallaalka cagaarshowga B ma aha wax soo saarka dhiigga.
- Tallaalka kama qaadi kartid cagaarshowga B.

## Waa maxay borotiinka difaaca jirka ee cagaarshowga B?

- Borotiinka difaaca jirka ee cagaarshowga B (HBIG) wuxuu difaac hore siin karaa dadka halista sare ugu jira caabuqa, sida dhallaamada cusub ee ay dhaleen hooyooyinka cudurka qaba.
- Waa wax soo saarka dhiigga. Dhiig-bixiyeyaasha si taxadar leh ayaa loo baaraa. Dhiiga waxaa loo baaraa loona daaweeyaa si loo yareeyo khatarta caabuqa.
- Ma farageliso tallaallada kale ee la siiyo xilliga dhallaanimada.

> Qalliinka dhalmada kama ilaalinayo canugaaga cagaarshowga B.
>
> Naasnuujinta waxay badqab u tahay canugaaga. Cagaarshowga B kuma faafo caanaha naaska.

## Sidee ayaan u ilaalin karaa carruurtayda kale?

Carruurta ku nool isla guriga dad qaba caabuqa muddada-dheer ee cagaarshowga B ayaa qaadi kara cudurka.

Cagaarshowga B waxa uu ku faafi karaa canug ama qof weyn oo qaba cudurka una gudbi kara carruurtaada kale haddii aan la tallaalin. Tallaal carruurtaada kale si aad uga ilaaliso caabuqa. Haddii adiga ama qof ka